

## Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha

### **Dulmarka**

Boston Children's Hospital (Cusbitaalka Carruurta Boston) (BCH) waxa uu ku ballan qaadayaa inuu noqdo goobta daryeelka carruurta baahan. BCH waxay kaalmo dhaqaale ku bixiyaan si waafaqsan Xeerka Kaalmada Dhaqaale bukaanada u qalma ee u baahan caawimada bixinta gurmada ama daryeelka caafimaad ahaan lama huraanka ah ee ay helaan.

### **Helitanaka Caawimaad dhaqaale\***

Waxaad awoodi doontaa inaad hesho kaalmada dhaqaale ee gurmada ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lama huraanka ah xaga BCH haddii aanad haysan daboolida daryeelka caafimaadka oo aanad u qalmin daboolida daryeelka caafimaadka. Fadlan ogow inay jiraan arrimo gaar ah oo ka reeban adeega kuwaasoo aan caadi ahaan u qalmin caawimada dhaqaale.

### **Sida loo Codsado Caawimaad Dhaqaale**

BCH, asagoo adeegsanaaya la taliyaashiisa dhaqaalaha, wuxuu ka caawinayaa bukaanada/damiintayaasha nidaamka codsashada caawimada Dhaqaalaha. La taliyaashiisa Dhaqaaluhu waxay ka caawinayaan bukaanada/damiintayaasha BCH iyo Mu'asadaadaha Dhakhtarka la xidhiidha ka codsashada barmaamijyada dad waynaha, sida Medicaid, MassHealth, ConnectorCare iyo Health Safety Net iyo/ama kaalmada dhaqaale BCH. Dadka raadinaya caawimada dhaqaalaha waxaa la waydiisan doonaa inay buuxiyaan Codsiga Caawimada Dhaqaalaha ayna soo gudbiyaan dukumiintiyada taageerada si loo cadeeyo.

### **Shuruudaha u qalmida**

Haddii kaaga iyo/ama damiintahaagu isku darka dakhliga qoyska uu yahay ama ka hooseeyo 400% heerka saboolnimada federaalka loo dejiyay, oo aad tahay qof sharci ahaan degen Massachusetts, Connecticut, Maine, New Hampshire, Rhode Island, Vermont ama New York (laga reebo aaga magaalada New York), waxaad u qalmi kartaa kaalmada dhaqaalaha. Ma jiro qof u qalma caawimada dhaqaalaha sida ku cad Xeerka Caawimada Dhaqaalaha ayaa laga qaadi doonaa lacag dheeraad ah daryeelka degdega ah ama caafimaad ahaan muhiimka ah si ka badan cadadka caadi ahaan biilka loogu soo diro shakhsiyadka leh daboolida qorshaha caafimaadka ee daryeelkaas. Haddii aad haysato daboolida daryeelka caafimaadka ama maalgelinta kale ee lagu bixinayo daryeelkaaga, waxa dhici karta inaanad u qalmin caawimada dhaqaale. Fadlan tixraac xeerka buuxa wixii ah sharaxaada buuxda iyo faahfaahinta.

### **Halka aad Ka helayso Macluumaadka**

Waxaa jiro qaabab badan ood ku helayso macluumaad ku saabsan nidaamka go'aaminta caawimada dhaqaalaha, ama aad ka helayso koobiyada Xeerka Caawimada Dhaqaalaha, Codsiga Caawimada Dhaqaalaha, iyo xeerka Daynta iyo Ururinta si bilaash ah.

- Ka soo deji macluumaadka onlaynka ah [www.childrenshospital.org/financialassistance](http://www.childrenshospital.org/financialassistance)
- Qoraal ahaan ku codso macluumaadka boostada ama adoo booqanaya Xarunta Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 165
- Codso macluumaadka adoo wacaaya Taageerada Macmiilka ee Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ood ka wacayso (617)-355-3397

Xeerka Caawimada Dhaqaalaha, Xogta Kooban ee Luqadda Fudud Ku qoran ee Codsiga Caawimada Dhaqaalaha, iyo Xeerka Daynta iyo Lacag Ururinta ayaa lagu heli karaa luqaddo badan.

\* Xeerka Caawimada Dhaqaalaha Boston Children's Hospital (Cusbitaalka Carruurta Boston) kuma habboona Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy ama sheeyo kale ee Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy.